

Macluumaad muhiim u ah qoysaska haysta ceymiska UCare PMAP ama MinnesotaCare

Laga bilaabo Sebtembar 1, 2025, UCare laguma heli doono 11 deegaan oo Minnesota ka mid ah Barnaamijka Ceymiska Caafimaadka Gobolka (Prepaid Medical Assistance Program ama PMAP) iyo MinnesotaCare. Isbeddelkan waxa laga yaabaa in uu saameeyo qorshaha caafimaadka ee qoyskaaga.

Deegaamadaasi waa: Benton, Chisago, Crow Wing, Pennington, Ramsey, Roseau, Sherburne, Stearns, St. Louis, Wadena, iyo Wright.

Waxa ku dhici kara ceymiska ilmahaaga

- **Ilmahaagu ma waayi doono ceymiska Medicaid ama MinnesotaCare.** Ceymsiku waa uu u sii shaqeyn doonaa ilmaha sababtoo ah xaq ayey u leeyihiin.
- **Waxa lagaa rabo waa in aad qoyskaaga u doorato qorshe caafimaad oo cusub.** Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Minnesota (Department of Human Services ama DHS) ayaa waraaq u soo diri doonta qoysaska uu isbeddelkan saameynayo. Waraaqdaas waxaa dadka loogu sharxi doonaa in ay kala dooran karaan **Blue Plus ama Medica** midkood si uu ceymis ugu noqdo.

Tallaabooyin muhiim ah

1. **Isla markiiba furo oo akhriso waraaqda ay DHS kuu soo dirto.**
2. **Dooro ceymis caafimaad oo cusub (Blue Plus ama Medica) ilaa 28ka Juliaay, 2025.** Raac tilmaamaha kuugu qoran waraaqda DHS si aad ceymis u doorato.
3. **Haddii aad dooran weydo ceymis cusub ilaa 28ka Juliaay, 2025,** waxaa si toos ah laguugu qorayaa ceymiska Blue Plus ama Medica. Si kasta ceymis waad haysan doontaan, balse in aad doorataan ceymiska aad rabtaan ayaa qoys ahaan idiin fiican.

Miyey ilmahaygu heli doonaan dhakhtarkoodii iyo daawooyinkii Children's Minnesota?

Waxaan fileynaa carqalad aad u yar in ay ku imaan karto daryeelka ilmaha iyo daawooyinka Children's Minnesota. Inta badan waan la shaqeynaa dhakhaatiirta iyo farmashiyeyaasha bukaansocodka ee qaata Blue Plus iyo Medica labadaba. Hase ahaatee, waxaa fiican in aad iska sii xaqiijiso dhakhtarka Children's Minnesota ama kilinigyada isla marka aad doorato ee uu kuu bilaabanayo ceymiska cusub. Fadlan kaarka ceymiska ee cusub ee ilmaha u keen kilinigga, isbitaalka, ama farmashiyaha.

Caawimaad miyaad rabtaa?

- **Su'aalaha ku saabsan doorashada ceymiska cusub:** Sida aad ula xiriiri karto ka eego waraaqda aad DHS ka heshay. Ama soo garaac taleefanka Xafiiska Caawinta Daryeelka Caafimaadka ee DHS 651-431-3722 ama 877-970-0047.
- **Caawimaad ah su'aalaha doorashada ceymiska cusub ama wixii su'aalo ah oo ku saabsan daryeelka Children's Minnesota:** Kala soo xiriir taleefanka xafiiska talabixinta dhaqaalaha ee Children's Minnesota oo ah 612-813-6432. Ballamaha waxaa la heli karaa Isniin ilaa Jimce, 9ka ilaa 4ta.